



April 16, 2025

**Subject: Jadwalka La Qiyaasay ee Dib-u-furista Fernwood**

**Cinwaanka: Jadwalka La Qiyaasay ee Dib-u-furista Fernwood**

Qoysaska iyo Shaqaalaha Qaaliga ah ee Fernwood, Waxaanu warqaddan kuugu soo qoraynaa si aan ku siino warbixin ku saabsan shaqada cusboonaysiinta liidhka ee ka socota dhismaha dugsigaaga. Waxaan maqalnay codsiyadiina ku saabsan in la helo macluumaad badan oo faahfaahsan waxaana naga go'an inaan idin siino warbixintaas.

**Heerka ay Shaqada Marayso**

Waxaan ku faraxsanahay inaan idin la wadaagno in maalinta Talaadada, Abriil 15, dib-u-cusboonaysiinta iyo rinjiyeynta Dugsiga Fernwood Montessori la dhammaystiray. Dhismaha wuxuu hadda si habsami leh uga socota nadaafad, taas oo aanu fileyno inay socon doonto ilaa dhamaadka usbuuca.

**Wixii Hadda Ka Dib Ah**

- Waxaan filaynaa in dhismaha uu diyaar u noqon doono kormeerka Waaxda Caafimaadka ee Magaalada Milwaukee (MHD) **maalinta Isniinta ah, Abriil 21.** Haddii MHD ay ansixiso in Fernwood la degi karo, waxaan markaa qorsheyneynaa in macallimiintu ay helaan maalinta Talaadada oo dhan, Abriil 22, si ay u habaystaan fasaladooda. Macluumaad dheeraad ah waxaa macalimiinta siin doona maamulaha Lowell.
- **Maalinta Talaadada, Abriil 22,** ardayda Fernwood waxay wali iska xaadirin doonaan Dugsiga Dhexe ee Douglas, halkaas oo ay ku soo dhawayn doonaan Milwaukee Rec, xubnaha kooxdeena tacliinta, iyo maamule ka socda Fernwood. Marka laga hadlayo dib-u-dejinta, waxbarashada khadka ah ayaa loo bixinayaa ikhtiyaar/xulasho ahaan. Haddii aad jeclaan lahayd inaad ka faa'iidaydado xulashadan maalinta Talaadada ah, fadlan la xiriir macalinka ilmahaaga. Fadlan ogow in maamulka Fernwood uu joogi doono goobta Douglas maalintaas.
- **MPS waxay rajaynaysaa in ardayda iyo shaqaalaha ay ku soo laabtaan Fernwood maalinta Arbacada ah, Abriil 23.** Fadlan fahan in jadwalkan uu isbedeli karo, laakiin, iyadoo lagu salaynayo jawaab-celintiina, waxaan rabnaa inaan idin la wadaagno waxa aan hadda ognahay. Haddii ay jiraan wax isbeddelo ah oo ku yimaadda jadwalkan, waxaanu isla markiiba idin kugu soo wargelin doonaa iimayl iyo wicitaan taleefan iyo [boggga Warbixinta Liidhka ee MPS](#). Gaadiidka MPS wuxuu sidoo kale diyaar u noqon doonaa inuu ardayda u qaado Fernwood maalinta Arbacada ah, sida caadiga ah.

## **Fursadaha Looga Jawaabayo Wixii Su'aalo ah**

Waxaan u mahadcelineynaa dhammaan intiina ka soo qeybgashay kulanka dadweynaha ee khadka tooska ah ee usbuucii la soo dhaafay. Waxaan ku guda jirnaa abuuritaanka Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo (FAQ) annagoo ka jawaabayna su'aalihii nala weydiiyay intii uu socday kulankaas. Waxa aanu qorshaynaynaa kulan kale oo dadweyne oo lagu qabto dugsiyada wali xiran, waxaana xogtaas lala wadaagi doonaa dugsiyadaas. Waxaan soo dhaweyneynaa wixii su'aalo dheeraad ah oo lagu soo diro [lead@milwaukee.k12.wi.us](mailto:lead@milwaukee.k12.wi.us).

## **Talaabooyinka Xiga**

Dugsiyada Dadweynaha Milwaukee waxay Waaxda Caafimaadka Milwaukee la dhamaystiraysaa qorshe hawleedkeeda liidhka. Marka MHD ay ansixiso qorshaha, MPS waxay la wadaagi doontaa dadweynaha.

Qoysaska waxaa lagu dhiirigelinayaa inay la xiriiraan daryeel-bixiyaha caafimaadka ilmahooda ama ay booqdaan rugta caafimaadka ee si loogu sameeyo baaritaanka liidhka ee caadiga ah haddii aysan hore sidaas u samaynin. Si aad u hesho wixii warar ah ee soo kordha, goobaha rugaha caafimaadka, iyo ilaha caafimaadka dadweynaha, booqo [mpsmke.com/mpsleadreport](https://mpsmke.com/mpsleadreport) ama [milwaukee.gov/MPS-Lead](https://milwaukee.gov/MPS-Lead). Ilo dheeraad ah ayaa laga heli karaa [milwaukee.gov/HEH](https://milwaukee.gov/HEH).

Waxaan xubin kasta oo qoys iyo xubin kasta oo shaqaale ah uga mahadcelinaynaa iskaashiga ay sameeyeen, inta aan sii dhexmeerayno tallaabooyinkan muhiimka ah ee lagu raadinayo badbaadada dhammaan dadkeena.

Daacad kuu ah,  
Xafiiska Maamulka Dugsiga